# *AF SOOMAALI*

## FASALKA SADDEXAAD

# 3

JAMHUURIYADDA DIMUQRAADIGA SOOMAALIDA
WASAARADDA WAXBARASHADA IYO BARBAARINTA
XAFIISKA MANAAHIJTA

Buuggan lama daabacan karo lamana guurin karo [illegible]
[illegible] Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta laga helin oggolaansho.

DAABACAADA [illegible]EDDEXAAD

Waxa lagu daabacay Madbacadda Qaranka.
Xamar — 1975

# TUSMADA BUUGGA


| Casharka | bogga |
|---|---|
| Xilliyada | 1 |
| Macallinkeen Allaw kaal (Hees) | 3 |
| Lahaansho Ahaansho | 5 |
| Kan kani kaasi | 7 |
| Laylis | 8 |
| Shalay, Maanta, Berri | 10 |
| Jilayaal | 12 |
| Shinni iyo Duqsi | 14 |
| Laylis | 16 |
| Xiritaanka Dugsiga | 19 |
| Warsame iyo Warmooge | 21 |
| Dacawo iyo Yaxaas | 23 |
| Waalidka | 25 |
| Libaax iyo Jiir | 27 |
| Booliska | 30 |
| Laylis | 32 |
| Caddo Niidhiya | 35 |
| Asluubta Ciyaarta | 37 |

**Casharka** **bogga**


| | |
|---|---|
| Ciyaar Kubbadeed | 39 |
| Nin iyo Wadaad | 41 |
| Cumar Beenaale | 44 |
| Shabeel iyo laba saaxiib | 47 |
| Laylis | 49 |
| Nebi Maxamad | 51 |
| Xoolaha | 53 |
| Muuska | 55 |
| Galleyda | 57 |
| Waraaqaha | 60 |
| Boosta | 63 |
| Gargaarka Degdega ah | 66 |
| Laylisyo | 68 |
| Sayid Maxamad Cabdulle Xasan | 70 |
| 21kii Oktoobar | 73 |
| Codka Macallinka | 76 |
| Culuunta | 78 |

# HORDHAC

Buugaggaa Af Soomaaliga ee Dugsiyda Hoose (I - VI) waa kuwo, qoriddooda lagala kulmay dhibaatooyin gaar ah; hase yeeshe, waa kuwo, haba koobnaadeene, ka jawaabaya ujeeddooyinkii laga lahaa barashada Afka.

In kasta oo barashada afafku ay ka'unkamaan barashada Dhegeysiga, Hadalka, Akhriska iyo Qoraalka, haddana waxa jirta in uu af waliba leeyahay waxyaaba isaga u khaas ah. Kuwaas oo keenaya in habka barashadiisu ay ka duwanaato ka afafka kale oo dhan. Qorayaasha buuggani iyaga oo taas maskaxda ku haya, isla markaa tixgelinaya waxyaabaha badan ee afafku ay wadaagaan, ayay isku-dayeen in ay buugga geliyaan **Wixii** iyo **Intii** ardayda heerkan loo dhigi lahaa.

Afarta qaybood ee afka (dhegeysi, hadal, akhris iyo qorid) ee lagu tilmaamo awoodaha salka ah barashadoodu sidaa uma kala qoqobna. Waxana dhici karta in afarta qaybood cashar qura carruurta lagu wada baro. Sidaas awgeed, ayaanay suurtoobahayn in la kala saarsaaro awoodihii afka ee la rabey in carruurta la baro, oo la yiraahdo xisaddan waxa ilmaha la barayaa «Dhegeysi» ta dambena «Akhris».

Iyada oo taasi ay jirto, ayaa haddana kollayba loo baahanyahay in loo qaybiyo Manhajka ama buugagga Afka qaybo u fududeeya macallinka jaangooyinta iyo raacidda tusaalooyinka ku dhigan.

Waxa iyana madhaafaan ah in halkan lagu xuso in Manhajka Af Soomaaligu siiba ka fasallada I, II iyo III uu aad iyo aad muhiim u yahay, la socod la'aantiisuna ay wax u dhimi karta fulinta ujeeddooyinka laga leeyahay buuggan. Manhajku tafaasiil iyo sharax fara badan ayuu ka bixinayaa sidii ilmaha loo bari lahaa xubnaha ama awoodaha kala duwan ee Afka. Manhajka aannu samaynay waa mid aannu is niri dhagax laba shimbirood ha ku wada dilo: macallinka waa in uu u ahaadaa marjac u jideeya **Wixii** iyo **Intii** uu ilmaha u dhigi

lahaa; isla markaa ha u noqdo manhajku macallinka tilmaame (Guide or Teacher's Handbook) ka kaaliya una habeeya baraha wixii uu u dhigi lahaa carruurta.

Waxa mahad iyo ammaan weynba aanu u jeedineynaa qorayaashii buuggan oo ah: .Axmed Guure Cali, Yuusuf Aadan Suleymaan, Ismaaciil Muuse Nuur, Axmed Cabdillaahi Boqorre, Axmed Maxamed Qaaddi, Maryan Weheliye Barre, Ibraahim Faarax Jooj, Cismaan Jamac Aadan, Maxamed Xaaji Cabdi, Cabdi Xaaji Dooddi, Cabdiraxmaan Maxamad Xisaam. Waxa iyaguna gacan ka geystey xagga heesaha buuggan macallimiinta ah Maxamed Cabdillaahi Riiraash iyo Siciid Saalax Axmed. Waxa kale oo aanu u mahad naqaynaa dhammaanba dadkii kale ee suurageliyey soo saaridda buuggan; dadkaas oo kala ah Cawil Maxamed Yaasiin oo musawirrada buuggan sameeyey iyo makiinad garaacayaashii buugga garaacay.

Ugu dambayntii, waxa si gaar ah u mahadsan Madaxda iyo Shaqaalaha Wakaaladda Madbacadda Qaranka oo xil gaar ah iska saaray daabacaadda buuggan.

**Bashiir Faarax Kaahiye**
Maamulaha Xafiiska Manaahijta

## CASHARKA KOWAAD

# XILLIYADA

Xilliyada Soomaalidu waa afar. Waxayna kala yihiin, Jiilaal, Gu', **Xagaa** iyo Dayr.



**JIILAAL** (Diisambar-Marso). Waa xilliga uu dhulku abaarta yahay, dabayshuna ka timaaddo Waqooyi-Bari.



**GU'** (Abriil-Juun). Waa Xilliga uu dhulku barwaqada yahay oo roobkuna aad u da'o.



**XAGAA** (Luuliyo-Agosto). Waa xilliga dabayshu ay ka timaaddo koonfur-Galbeed; roobkuna waxa uu ka da'aa meelaha xeebaha ah ee gobolada koonfureed.




**DAYR** (Sibtembar-Noofembar) Waa xilliga uu meel kastaba ka da'aa roob aan sidaa u badnayn.

**LAYLIS :**

**I. Weydiino :**

1. Waa immisa xilliyada Soomaalidu ?
2. Xilligee bay dabayshu ka timaaddaa Waqooyi-Bari ?
3. Xilligee buu dalku aad u barwaaqaysan yahay ?
4. Goorma ayay dabayshu ka timaaddaa Koonfur-Galbeed ?
5. Sheeg bilaha xilliga Maajo iyo Oktoobar ay ku jiraan ?
6. Bilahee buu dalkeennu jiilaal yahay ?
7. Xilligee baad ugu jeceshahay ?

**II. Ku qor jahooyinka ka maqan .**




**III.** 1. Maxaa jahooyinka lagu gartaa ?

2. Ninbaa magaalo ka baxay. Tuban mayl markii uu u socdey Bari ayuu joogsadey. Haddana toban mayl oo kale ayuu Galbeed u socday. Wuu istaagey. Intee buu magaalada uu kategey u jiraa? Magaaladu xaggee bay ka xigtaa? Haddii uu misana toban mayl oo Kale Koonfur u socdo xagee bay immika magaaladu ka xigtaa ? Toban mayl buu haddana Bari u dhaqaaqay, xagee bay magaaladii ka xigtaa?

3. Sawir dariiqii uu maray ninku.

## MACALLINKEEN ALLAW KAAL (Hees)




Waa madal hadhweynoo
Ceel maaxanaayoo
Aan madhanaynin weligii
Macallinkeen Allaw kaal.
Maskaxda iyo maankiyo
Waa ka muruqa laylee
Macallinkeen Allaw kaal.
Waa mahiigaanka roobkoo
Dadka oo harraad mutay
maasheeyey dunidee
Macallinkeen Allaw kaal.
Dunidoo madaw oo
Mugdiyo cabsi leh oo
Mici ku dhiigliyo
mas dilaa ay joogaan
waa ka marinka nuuree
Minan Janno Allaw gee.
Mira Janno Allaw Sii.
Macallinkeen Allaw kaal.

LAYLIS :

I. Erayadan macnahooda sheeg.

Madal, maax, kaal, mahiigaan, maansheeyey, mugdi, minan.

## II. Weydiinahan weedho u beddel.

Sida: Geeddi miyuu magaaladii qabtay ?
Geeddi magaaladii buu qabtay.

1. Dugsiga miyaa la xiraa ?

2. Quraacdii miyaad soo cuntay ?


3. Ma berri bay dayuuradu imanaysaa ?

4. Walaalkaa si fiican wax ma u bartaa ?

5. Shalay ma roob baa da'ay ?

CASHARKA SADDEXAAD

## LAHAANSHO AHAANSHO



Waxa aan ahay arday ku jira Dugsiga Hoose ee Macalin Jaamac. Aabahay waa bare. Hooyadayna waa dhakhtarad.

Waxa aan leeyahay saaxiibbo badan oo aannu dugsiga ku wada jirro. Waxa aannu wada leenahay kutubta dugsiga aannu ku dhiganno iyo kubbad aannu ku wada dheello.

Gooni ahaan waxa aan u leeyahay buugagga wax lagu qoro iyo qalimada. Waxa kale oo aan leeyahay dharka dugsiga u gaarka ah.

Aniga, saaxiibaday iyo ardayda kale ee dugsigayagu waxa aannu leenahay barayaal iyo Maamule fiican. Barayaashaasu waxa ay leeyihiin aqoon sare iyo naxariis badan, ardayduna way wada jecel yihiin.

LAYLIS:

**I. Buuxi meelaha madhan :**

1. waxa aan **ahay arday**.
2. Waxa uu . . . . . . . . . . . .
3. Waxa ay . . . . . . . . . . . .

4. Waxa aannu . . . . . . . . . .
5. Waxa aynnu . . . . . . . . . .
6. Waxa **aad** . . . . . . . . . . .

**II. Buuxi meelaha bannaan:**
waxa aan **leeyahay kubbad.**

1. **waxa uu** . . . . . . . . . . . .
2. Waxa ay . . . . . . . . . . . .
3. Waxa ay . . . . . . . . . . . .
4. Waxa aynnu . . . . . . . . . .
5. Waxa aad . . . . . . . . . . .
6. Waxa aannu . . . . . . . . . .

**III. War celintan dhammaystir adiga oo raacinaya magac u yaallada ku hor qoran:**

TUSAALE :

Buugan yaa leh ?

Aniga: **waa kaygii.**

Adiga: . . . . . . . . . . . . . .
Isaga: . . . . . . . . . . . . . .
Iyada: . . . . . . . . . . . . . .
Idinka: . . . . . . . . . . . . . .
Annaga: . . . . . . . . . . . . . .
Iyaga: . . . . . . . . . . . . . .
Innaga: . . . . . . . . . . . . . .

**IV. Diidmo u beddel weedhahan:**

**TUSAALE :**

Cali waa bare.

Cali ma aha bare.

1. Laba shaar baan leeyahay.
2. Guri weyn bay leeyihiin.
3. Gabartani waa fariid.
4. Wiilashu waa arday.
5. Dal ballaaran baannu leenahay.

## CASHARKA AFRAAD

1. Kan — Kani — Kaasi.
tan — tani — taasi.
Halkan — halkani — halkaas.

---------------- kan, tan, halkan

waa kan Cali.
Waa tan Caashi.
Kani waa kuma? Kani waa Cali.
Tani waa tuma? tani waa Caasha.
Kaasi waa maxay? Kaasi waa kitaab.
Halkan yaa fadhiya? Halkaas ayaa hurdda?
Halkaas inan baa hurdda

**I. Meelahan bannaan ku buuxi xarfahan hoos ku yaal:**
kan, tan, kani, kaas, taasi, halkan,.

1. . . . . . . . .aan joogno waxa la yiraahdaa Berbera.
2. Waa . . . . . . hooyaday.
3. . . . . . . . . . . . ila socdaa waa walaalky.
4. Ma aha tani geenyadii aynnu shalay fuulnay . . . . . . . . . . . . . . . . . caddaan bay ahayd.
5. . . . . . . . . . . . Waa kuma?
6. Waa . . . . . . . . . . . . saaxiibkay.
7. Waxaan doonayaa in aan imaaddo . . . . . . . . . aad fadhido.

**II. Weedhahan hoos ku qoran mid walba qaladdo ayaa ku jira, soo saar dabadeedna hagaaji.**

1. Caashi shalay bay magaaladii ka iman doontaa.
2. Geelayagu waxa uu ka cabbaan togga Burco.
3. Aniga baa kubbadda laaday.
4. Waxa aan arkay biyo badan oo dooxa ordaya.
5. Axmed iyo Geeddi waa saaxiib, shaahana way isku shubaan.

**III. Feegar. (Farta xoodan)**

**Kani waa eygii shalay bisadda diley.**

LAYILS :

1. Raaci qodob ereyada hoos ku yaalla:

**TUSAALE:**

Nin = Ninka.

Libaax; duq; bilow; geel; hal; cunto;
bannaan; kayn; naag; xaashi; buur; dundumo;
il; ilmo; waraabe; macallin; wiil;
buug; carab; arday.

2. **Ereyada hoos ku qoran jamac ka dhig:**

**TUSAALE:**

Af = Afaf

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| Miis; | walaal; | macallin; | faras; | askari; |
| hooyo; | arday; | wan; | nin; | aabo; |
| inan; | guulwade; | naag; | webi; | geel; |
| bisad; | wiil; | mindi; | kayn; | qalin. |

3. **Labalabada eray ee hoos ku qoran iskaga dhig eray keliya.**

**TUSAALE :**

Waa-aan = waan.

waa—aad; waa—ay; waa—uu; waa—aydin;
waa—aannu; waa—aynnu; waa—aydin.

4. **Weedhahan hoos ku qoran ku buuxi eraydan :**

Waxaynnu, wuxuu, waxay, waxaydin, waxaad.

b) . . . . . . . . . . tegayaa dugsiga.
t) . . . . . . . . . . tegeysaa dugsiga.
j) . . . . . . . . . . tegaynnaa dugsiga.
x) . . . . . . . . . . tegeysaan dugsiga.
kh) . . . . . . . . . . tegeyaan dugsiga.

**5. Weedhahan hoos ku qoran ku buuxi falka ku hagaagsan.**

b) Anigu salaaddaan tukadaa.

t ) Adigu salaaddaad . . . . . . . . . . . . . . .

j ) Innagu salaaddan . . . . . . . . . . . . . . .

x) Iyagu salaadday . . . . . . . . . . . . . . . .

kh) Annagu salaaddaan . . . . . . . . . . . . . . .

d) isagu salaadduu . . . . . . . . . . . . . . . .

r) Canab Salaadday . . . . . . . . . . . . . . .

s) Cusmaan iyo Cali salaadday . . . . . . . . .

sh) Aniga iyo adiga salaaddaan . . . . . . . . . .

dh) Ardaydani salaadday . . . . . . . . . . . . .

CASHARKA LIXAAD

**SHALAY MAANTA BERRI**



Anigu shalay carruur baan ahaa. Socodka ayaa la i bari jirey. Waa la ii qubayn jirey, sariirtana waa la i seexin jirey.

Walaashayna caruur bay ahayd. Socodkaa la bari jirey. Waa loo qubeyn jirey, sariirtana waa la seexin jirey. Anigu hadda waan koray lugahaygaanan ku socdaa. Keligey baan qubeystaa oo sariirta seexdaa. Walaashayna hadda way kortay lugaheeda ayay ku socotaa. Keligeed bay qubaysataa oo sariirta seexataa. Anigu berri waan weynaan doonaa. Aqoon badan ayaan yeelan doonaa. Dalkayga iyo dadkayga ayaan u adeegi doonaa. Walaashayna way weynaan doontaa. Dalkeeda iyo dadkeeda ayay u adeegi doontaa.

**LAYLIS :**

**I. Meelahan bannaan buuxi :**

1. Markii aan carruurta ahaa . . . . . . . . . . . . . . .

2. Shalay buu aabbahay . . . . . . . . . . . . . . . .

3. Aniga hadda . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . .

4. Walaashay markii ay weynaato . . . . . . . . . . .

5. Isaga maalin walba . . . . . . . . . . . . . . . .

5. Isagu maalin walba . . . . . . . . . . . . . . . .

7. Annagu marka aannu carruurta ahayn . . . . . .

8. Innagu marka aynnu dugsiga dhammayanno . . . . .

9. Maalin walba idinku . . . . . . . . . . . . . . . . .

10. Dhulkayga waan u . . . . . . . . . . . . . . . . . .

**II. Eryadan weedho soo geli :**

Shalay; aqoon; garaad; adeeg; qubayn; koray.

## JILAYAAL

| | |
|---|---|
| Kooxda Koowaad : | Waxaannu nahay jilayaal. |
| Kooxda Labaad : | Annaguna waxaannu nahay jilayaal. |
| Kooxdii Koowaad : | Sidee weeye jiliddiinu ? |
| Kooxdii Labaad : | Sidan weeye jiliddayadu : |

Waxaan jillaa hoggaamiyaal:

Dadkaan hagnaa, hoggaaminnaa, hanuuninnaa
Sidaana waan ku ammaanannahay.

| | |
|---|---|
| Kooxdii Koowaad : | Annaguna waxaan nahay beeraley: beerahaan falnaa, badarka, cambaha iyo muskaannu soo saarnaa, sidaana waan ku ammaananahay. |
| Kooxdii Labaad : | Annaguna waxaanu nahay shaqaale. Shaqooyin kala duduwan baan qabannaa noloshaan qurxinnaa, sidaana waan ku ammaanannahay. |
| Kooxdii Koowaad : | Anaguna waxaannu nahay qorayaal. Bugaggaan qornaa. Afka hooyaannu ku qornaa, sidaana waan ku ammaanannahay. |
| Kooxdii Labaad : | Annagu waxaannu nahay raacato. Xoolahaan dhaqaalayn naqaan. Sidaana waan ku ammaanannahay. |
| Kooxdii Koowaad : | Annagu waxaannu nahay jilayaal, waxaan jillaa :<br>Hoggaamiyaal;<br>Shaqaale;<br>Arday;<br>Raacato;<br>Sidaana waan ku ammaanannahay. |

Kooxdii Labaad : Annagu waxaannu nahay jilayaal, waxaannu nahay jilayaal, waxaan jillaa:
Beeralay;
Barayaal;
Qorayaal;
Dhakhtarro;
Sidaana waan ku ammaanannahay.

**LAYLIS :**

Ardaydu casharkan riwaayad ha ka sameeyeen. Laba kooxoodba mar ha tagaan fasalka hortiisa, dabadeedna ha jilaan waxa casharka ku yaal, inta kalena ha dhegeysato oo ha daawato.

## SHINNI IYO DUQSI



Duqsi baa duulay, neef bakhtiyey buu ku dul fariistay.

Shinni baa duushay ubax bay ku dul fariisatay. Labadoodii bay sheeko dhex martay:

**Duqsigii** : Agtayda ka tag waan ku necebahaye.

**Shinnidii** : Anigu bakhtiga aad cunaysid uma soo socdo, waxa igu filan ubaxan quruxda badan ee aan fuushanahay.

**Duqsigii** : Waa run in aad wax xun tahay, maxaa yeelay miciyo halis ah baad leedahay, haddana dadka kuma qaniintid. Waliba waxa jirta in aad dadka saaxiib la tahay.

**Shinnidii** : Waxa jira in aan dadka marmar qaniino; waase marka ay i dhibaan ee ay i soo gardarraystaan. Hase yeeshee waxa aan sameeyaa malabka macaan ee uu dadku aad u jecel yahay.

**Duqsikii** : Adigu malabka ayaad dadka u samaysaa. Iyaguna abaal la'aan bay kaaga gurtaan. Aniguse haddii aan karaayo naftaan ka wada qaadi lahaa dadka oo idil.

**Shinnidii :** Miyaanay kugu fillayn dhibaatooyinka aad dadka u geysatid ? Habeen iyo maalin waxa aad lugaha iyo baalalka ku siddaa wisikh, markaasaad ku fariisataa caanaha la dhamo, hilibka iyo rootida la cuno. Waxa aad tahay cadawga ugu weyn ee dadku leeyahay. In ay iska kaa ilaaliyaana way wanaagsantahay aniganа waxa igu habboon in aan kaa fogaado oo aan ka tago urtaada iyo wisikhdaada.

## LAYLIS :

### I. Weydiino :

1. Xaggee bay shinnidu iyo duqsigu ay kala joogeen ?
2. Muxuu duqsigu shinnida ku yiri ?
3. Maxay shinnidu dadka u sameysaa ?
4. Adigu waligaa malab ma cuntay ?
5. Wax ka sheeg dhibaatooyinka uu duqsigu dadka u geysto ?

### II. Meela bannaan buuxi:

1. Malabka wax a . . . . . . . . . . . . . . Shinnida.
2. Duqsigu waxa uu lugaha ku soo qaadaa . . . . . .
3. Duqsigu waxa uu ku fariistaa . . . . . . . . aynnu cunno.
4. Duqsigu . . . . . . . . . . . dadkuu wax yeelaa.
5. Duqsigu . . . . . . . . . . . . . . . . . . jecel yahay.

## LAYLIS :

Oktoobar 1974

| | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|
| Sabti | | 5 | 12 | 19 | 26 | |
| Axad | | 6 | 13 | 20 | 27 | |
| Isniin | | 7 | 14 | 21 | 28 | |
| Talaado | 1 | 8 | 15 | 22 | 29 | |
| Arbaco | 2 | 9 | 16 | 23 | 30 | |
| Khamiis | 3 | 10 | 17 | 24 | 31 | |
| Jimce | 4 | 11 | 18 | 25 | | |

**I. Fiiri Kaalandarka kor ku yaal dabadeedna ka jawaab weyddiinahan.**

b) Imisa Axadood ayaa ku jira bisha Oktoobar 1974 ?

t ) Imisa Sabti ayaa ku jira ?

j ) Imisa Talaada ayaa ku jira ?

x) Axaddii labaad ee bisha Oktoobar imisa ayay ahayd taariikhdu ?

kh) Taariikhdu imisa ayay ahayd Khamiistii bisha ugu dambaysey ?

2. Fiiri Talaadadii ugu horreysey Oktoobar dabadeedna fiiri maalinta ka horreysa. Isniin bay ahayd, Taariikhduna waxa ay ahayd ....... ? Isniintaasi bishee bay ku jirtaa ?

3. Bisha Oktoobar ku xigtaa waa Noofambar. Fiiri kaalandarka oo waxa aad soo saartaa maalinta ugu horraysa Noofambar.

4. Maalintee baa ku xigtay 17ka Oktoobar ?
5. Immisa maalmood baa ku jirey bisha Oktoobar ?
6. Oktoobar 21keedu waa maalin weyn maxaa dhacay ?
7. Maalin kale oo Oktoobar ku jirta oo xasuus leh ma taqaan ?

**II. Weedhahan waxad u beddeshaa shalay :**

TUSAALE : — Berri waxa aan beddeli doonaa dharkan aan xiranahay.
— Shalay waxa aan beddeley dharkii aan xirraa.

1. Berri waxa aan tegi doonaa dugsiga.
2. Imminka waan shaqaynayaa
3. Berri buug cusub baan soo iibsan doonaa.
4. Berri waxa uu iska beddeli doonaa dharka.
5. Imminka waxa ay u qaybinaysaa lacagteedii laba meelood.
6. Imminka waa inaan wax ka qoraa casharkan.
7. Berri waxa aan raaci doonaa saaxiibkay.

**III. Magacyada weedhahan ku jira jamac ka dhig:**

**TUSAALE :** Nin weyn baan la saaxiibay.
Niman waaweyn baan la saaxiibay.

1. Miis yar baan haystaa.
3. Qalin dheer buu i siiyey.
3. Gabar qurux badan buu dhalay.
4. Wan shilis buu gawracay.
5. Shaar cad buu leeyahay.

**VI. Soo geli weedhahan erayga «la» ama «la'».**

**TUSAALE :**

Waa afartii oo shan . . . . . . . . . . . . . . .
Waa afartii oo shan **la'**.
Shimbir baal . . . . . . . . . . baan arkay.
Shimbir baal la' baan arkay.
Cashar cusub baa . . . . . . . . . . digay.
Cashar cusub baa **la** dhigay.

1. Saacadu waa lixdii oo toban . . . . . . . . . . . . .
2. Cali waa wiil indha . . . . . . . . . . . . . . . . . .
3. Cashar cusub baa . . . . . . . . . . . . . . . dhigay.
4. Nin baa . . . . . . . . . . . . siiyey billad sharaf.
5. Neef dhego . . . . . . . . . . . . . . ayaan iibsadey.
6. Ilmo gacan . . . . . . . . . . . . . . ayay dhashay.
7. Wuxuu shaqo tagaa lixda oo shan . . . . . . . . . .
8. Shalay libaax baa . . . . . . . . . . . . . . . . . dilay.
9. Oday ilka . . . . . . . . . . . ayaa soo galay dugsiga
10. Saaxiibkay baan . . . . . . . . . . . . . qaadeeynay.

V. **Soo geli weedhahan "i" ama "ii"**

**TUSAALE :**

. . . . . . . . . . . sii Buugga Xisaabta.


I sii Buugga **Xisaabta.**

Buug . . . . . . . . . . . sii abaal gud.

Buug ii sii abaal gud.

1. Waxa uu . . . . . . . . . . . . . . siiyey shaar cusub.
2. Ilmihii bay . . . . . . . . . . . . . . . siisay caano.
3. Waxa uu . . . . . . . . . . yimid afartii iyo badhkii
4. Waxa ay . . . . . . . . . . . . keentay kabo yaryar.
5. Laba go' buu . . . . . . . . . . . . siiyey abaal gud.
6. Barahaa . . . . . . . . . . . yiri fasalka ha ku qaylin.
7. Waxa uu . . . . . . sheegay in aan wanaagsanahay.
8. Shaqo ayuu . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . siiyey.
9. Aniga oo hurda ayuu . . . . . . . . . . . . . yeeray.
10. Isaga oo caroonaya ayuu . . . . . . . . . salaamay.

## XIRITAANKA DUGSIGA



Sannadkii waxbarashada ayaa dhammaaday. Dugsigii baa la xirayaa, fasaxiina wuu bilaabmayaa. Saaka waxa dugsiga jooga ardaydii, barayaashii iyo dad kale oo farabadan oo debedda ka yimid. Dadka debeda ka yimid waxa ay ka kooban yihiin waalidka ardayda, duqeyda magaalada iyo dadweyne kale.

Barayaashu imtixaankii way soo saareen. Arday waliba halkii uu galayna waa loo sheegayaa. Waxa abaalgud la siin doonaa arday badan : kuwii imtixaanka ugu fiicnaa, kuwi nadaafada badnaa iyo kuwii ugu dadaalka iyo shaqada badnaa.

Marka sheegsheegidda imtixaanka iyo abaal gud bixinta la dhammeeyo ardaydu way kala tegi doonaan. Mid waliba gurigoodii ayuu qabanayaa fasax baano gelayaa. Kii imtixaankii gudbey ee meel fiican galay isaga oo faraxsan ayuu reerkooda u tegayaa; hooyadii iyo aabbihiina way ku farxayaan. Kii gudbiwaayana isaga oo murugeysan ayuu reerkooda u tegayaa; hooyadii iyo aabihiina way ka naxayaan.

**LAYLIS :**

1. Maxaa dugsiga loo xirayaa ?

2. Dadka dugsiga soo booqday maxay ka koobnaayeen ?

3. Ardayda kuwee baa abaal-gud la siinayaa ?

4. Waligaa abaal-gud ma qaadatay ?

5. Ardayga imtixaanka gudbiwaaya waalidkiisu sidee buu noqdaa ?

**II. Dhammaystir weedhahan hoos ku qoran :**

1. Xasan waxa uu reerkoodii tegey isaga oo . . . . . .
2. Caashi saaka waxa ay dugsiga timid iyada oo . . . .
3. Waxa aynu magaalada tegi doonnaa innaga oo . . .
4. Cuntada ha cunin adiga oo aan . . . . . . . . . . . .
5. Maxamed baan arkay isaga oo . . . . . . . . . . . .

**III. Weedhahan hoos ku yaal weydiino u samee :**

**TUSAALE :**

Dugsiga waxa la furaa siddeedda saacadood ee aroornimo. Goormaa dugsiga la furaa ?

1. Xirsi shalay buu Hargeysa yimid.
2. Inantu imtixaanka way gudbi doontaa.
3. Cuntada bariiska ayaan ugu jeclahay.
4. Bisaddu jiirka way cuntaa.
5. Xasan waa la neceb yahay.
6. Walaashay laba sannadood baan ka weynahay.
7. Anigu waan caafimaad qabaa.
8. Libaaxu dameerka ayuu le'eg yahay.
9. Maxamed kubbadda si wanaagsan buu saaka u ciyaaray.
10. Maroodigu libaaxa wuu ka wenyahay.

CASHARKA TOBAN IYO KOWAAD

## WARSAME IYO WARMOOGE



Warsame iyo Warmooge waxa ay ahaayeen laba arday oo saaxiib ah, oo aad isu jecel. Iyaga oo maalin sheekaysanaaya ayuu Warsame Warmooge ku yiri :

Saaxiib Warmoogow, shalay kuumaan imanne raali iga ahow.

**Warmooge :** Waxba kuma jiraan saaxiib.

**Warsame :** Ma kuu timid xaashidaan shalay kuu soo diray?

**Warmooge :** Haa, hase yeeshee may xirrayn: maad soo xabagaysid ?

**Warsame :** Raalliiga ahow waan hilmaamaye. Waxa aan ku weydiiyey, ma ku noqoteen dugsigii xalay ?

**Warmooge :** Haa, hase yeeshee muu joogin barihii.

**Warsame :** Oo maxaa dhacay shalayna muu imanne ?

**Warmooge :** Waxa la yiri wuu bukaa oo cusbataalka ayaa la dhigay.

Warsame : Saaxiib warkaa aad ii sheegtay aad baan uga xumahay. Maxa ay kula tahay haddii aynnu galabta soo booqano ?

Warmooge : Waa talo fiican. Waa in aynnu galabta u tagnaa.

**LAYLIS :**

**I. Meelaha bannaan erayadan ku buuxi:**

ma, maad, ma"aan, maydaan, ma aannu, may.

1. Annagu qalinka aad sheegayso . . . . . . arag.
2. Anigu saaka quraac . . . . . . . . . . . cunin.
3. Cali . . . . . . . . . . . . . . . . aragtay.
4. Haddii aad walaalkay shalay aragtay . . . . . . . ii sheegtid.
5. Saaka barihii dugsiga . . . . . . . . . . joogin.
6. Caashi weli . . . . . . . . . . . . . . arag libaax.
7. Labadan inan shalay dugsiga way yimaaddeen, hase yeeshee idinku . . . . . . . . . . . . iman.

# DACAWO IYO YAXAAS



Maalin baa dacawo u timid yaxaas webi qarkiisa jooga. Waxa ay ku tiri: «Adeer yaxaasaw, walaashay baa caawa la aroosayaa, waxa igu habboon in aan si wanaagsan ugu mashaxaradaa; hase yeeshee, carrab ma lihi. Markaa waxa aan kaa codsanayaa in aad kaaga ii amaahisid».

Yaxaaskii erayadii dacawada aad buu ugu bogey, dabadeedna carrabkiisii buu u saaray. Wuxuuse kula ballamay in ay si degdeg ah ugu soo celiso.

Dacawadii markii ay qaadatay carrabkii yaxaaska ayay carartay, meel yaxaaskii ka fog inta ay istaagtey ayay mashaxarad ku dhufatay : «Ulululu-Ulululululu-Ililililli-Ilililili. Wallee yixaasaw carrabkaagii kuuma soo celiyo».

Yaxaaskii aad buu u carooday. Markaasuu ku yiri: «Wallee adigana, Dayoy biyo webi kaa xiran».

Sidaas ayay dacawadu yaxaaska carrabkiisa uga khayaamaysay. Marka dacawada uu oon qabto, si dhuumasha ah bay biyaha webiga uga cabtaa, waxana ay ka baqaysaa in uu yaxaaskii arko oo uu ka aar-goosto.

**LAYLIS :**

**I. Weydiino :**

1. Xaggee buu yaxaasku joogey ?
2. Maxaa ay dacawadu yaxaaskii ku tiri ?

3. Markii ay dacawadu carrabkii yaxaaska qaadatay maxay samaysay ?

4. Maxaa u yaxaasku dacawada ku yiri ?

5. Dacawadu si dhuumasha ah bay biyaha webiga uga cabtaa. waayo ?

**II. Eraydan ku bedel kuwo kale oo la macna ah ama kuwo ku dhowdhow:**

1. Yaxaaskii ereyadii dacawada aad buu ugu **bogey**.

2. Saaka waxa aan arakay Cabdi oo **cayaaraya kubbad.**

3. Maxamed waxbarashada **wuu ku** wanaagsan yahay, **hase ahaatee** wuu dabeecad **xun yahay**.

4. Xalay hurdo ma **ladin.**

5. Waxa igu **habboon** in aan si wanaagsan wax u bar**taa.**

6. Xasan saaka aroortii buu **jarmaaday.**

7. Filimkii xalay aan galay aad baan uga **helay.**

8. Arday walba waxa laga **rabaa** in uu dhar nadiifa soo qaato.

9. Inantani aad **bay u maskax furan tahay.**

10. Yaxaaska carrab **laguma arko.**

CASHARKA TOBAN IYO SADDEXAAD

# WAALIDKA.



Qofka bani aadmiga ahi intuu doonaba ha le'ekaadee waxa uu u baahan yahay in la ixtiraamo. Dadku haddii aanay is-ixtiraamin oo aanay is xishmaynin, si wanaagsan uma wada noolaan karaan.

Waxa ixtiraan dheeraad ah inagu leh waalidkeenna. Waalidku ma aha aabbaha iyo hooyada oo keliya ee waa qof allale qofkii ku soo koriyey, ee kugu soo tabcay. Waalidku had iyo jeer waxa ay jecelyihiin in uu ilmahoodu nolol fiican ku noolaado. Hadduu ilmuhu bukoodo ama dhibaato kale ay gaarto waalidku aad buu uga xumaadaa oo wuu naxaa. Waalidku isagu had iyo jeer waxa uu jecelyahay wanaagga ilmihiisa, xumaantiisana wuu neceb yahay. Waxa waalidka la siman xagga ixtiraamka marka loo eego, baraha. Baruhu waa aabaha ama hooyada labaad ee aynnu wax ka baranno. Baruhu maskaxdeenuu koriyaa kuna beeraa fikrad caafimaad qabta. Sida waalidka oo kale baruhu wanaagga ardaydiisa wuu ku farxaa xumaantoodana wuu ka naxaa.

LAYLIS :

I. **Weydiino :**

1. Waalidku waa kuwee ?
2. Aabbaha iyo hooyadu maxay ubadkooda u qabtaan ?
3. Baruhu muxuu taraa ?
4. Waalidka iyo baruhu maxay jecelyihiin ?
5. Heeso badan oo baraha lagu amaanayo ayaa jira, mid sheeg dabadeedna qaad ?

II. **Erayadan ku bedel kuwo la macna ah ama kuwo aad ugu dhow :**

1. Waalidkaa xumaantaada wuu ka **naxayaa.**
2. Waalidka iyo baruhu waa **lama huraan.**
3. Shaarkayga iyo ka Cali waa kala **kaan.**
4. Waalidkaa waa in aad had iyo jeer ka **dambaysaa.**

III. **Tilmaamaha hoos ku yaalla u rog magac dahsoon :**

**TUSAALE :** Nacas: nacasnimo.
Wanaagsan : wanaag.
xariif : xariifnimo.


fariid, dheer, cusub, kulul, noolyahay,
fulay, caraysan, casyahay, toosantahay, baranayaa.

IV. **Erayga «jir» macnahiisu wuu badan yahay.**

**Weedhahan hoos ku qoran mid walba macna goonni ah buu ku leeyahay, sheeg mid kastaba:**

1. Maxamed Hargeysuu **jiraa.**
2. Xasan ariguu **jiraa.**
3. Gaariga iska **jir** yuu ku jiirine.
4. Markaan yaraa kubbaddaan ciyaari **jirey.**
5. Dunida ma **jiro** ruux afar indhood lihi.
6. Waqtiga jirka xooluhu way gaajoodaan.

# LIBAAX IYO JIIR



Maalin baa libaax geed hoos jiifa jiir madaxa ka maray. Libaaxii baa intuu kacay jiirkii qabtay. Markaasuu ku yiri isaga oo carraysan «Jiirkaagan yari sidee baad ugu dhacaday in aad madaxayga martid ? Miyaadan ogayn in aan kaa xoog weynahay oo ku burburin karo ?» Jiirkii markii uu hadalkaa maqlay ayuu gariirey baqdin aawadeed markaasuu yiri, «In aan madaxa kaa maro kuu lama aan kasin waanse kuu gefey ee raalli ahow. Imminkana waxa aan kaa baryayaa in aad ii dembi dhaaftid. Haddii aad ii dembi dhaaftid waxa aan hubaa in aan mar uun kuu abaal gudi doono».

Libaaxii hadalkii jiirka intuu ku qoslay ayuu ku yiri, «Anigu waan iska kaa deynayaa: hase yeeshee u malaymaayo in aad abaalgud ii samayn kartid ee orod oo hortayda ka tag».

Dhawr maalmood ka dib ayaa libaaxii dabin xarko ah loo dhigay oo uu ku dhacay. Markaasuu ciyey oo ciyay oo raftay. Waxana uu isku deyey in uu dabinka ka baxo, hase ahaatee way u suurtoobi weydey.

Jiirkii baa maqlay cidiisii markaasuu u yimid, wuxuuna ku yiri, «Ha murugoon aniga ayaa dabinka kaa saarayee». Jiir-

kii xarkihii dabinka ayuu ilkihiisii fiiqfiiqnaa ku jarjaray. Muddo yar ka dibna libaaxii waxa uu ka saaray dabinkii. Libaaxii jiirkii isaga oo u mahadnaqaaya ayuu ku yiri «Weligey intii aan jirey maskaxda kuma qaban bahal yar oo intaadaa le'eg baa wax ku tari» Jiirkii waxa uu ugu jawaabey, «ku talagal hadda ka dib in uu nin yari nin weyn wax tari karo».

**I. Weydiino :**

1. Muxuu libaaxu sameeyey markii uu jiirkii madaxa maray ?
2. Jiirku muxuu libaaxa weydiistey ?
3. Libaaxu muxuu ku qoslay ?
4. Jiirkii muxuu libaaxa ugu abaalgudey ?
5. Markuu libaaxu dabinka ka baxay muxuu jiirkii ku yiri ?

**II. Erayadan hoos ku qoran weedho gaagaaban geli :**

Weligey, hase yeeshee, aawadeed, jiifsaday, mahad-naqay.

**III. Isla raadso erayada isku habboon si aad weedho qumman u heshid :**

| | | | |
|---|---|---|---|
| 1. | Anigu | weligeed | Libaax maan arag. |
| 2. | Iyagu | weligii | Mayaanan dabbaalan |
| 3. | Iyadu | weligey | been ma sheegin |
| 4. | Innagu | weligayo | sheekadaa maannan maqlin |
| 5. | Isagu | weligood | Burco may arag. |
| 6. | Annagu | weligeen | |

**IV. Dhammee weedhahan adiga oo falka meesha lagu muujiyay isticmalaya :**

1. Berri magaaladaan ( teg )
2. Saaka quraac maan (cun)

3. Maxamed maalin walba dugsigu (aad)

4. Iska tuur maradan wasakhaysan yaan dadku kugu (qosl).

5. Berigaanu (yar) kubbadda ayaannu ciyaari jirnney.

**V. Meelahan bannaan erayo ku habboon ku buuxi :**

1. Shalay afartii . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . .
2. Libaaxu waraabaha . . . . . . . . . . . . . . . . . . .
3. Ardaygu barihiisa . . . . . . . . . . . . . . . . . . . .
4. Markaan arkay aabbahay . . . . . . . . . . . . . . .
5. Saaka Cali baan arkay isaga oo . . . . . . . . . . .
6. Markuu roobku da'o . . . . . . . . . . . . . . . . . .
7. Haddii aad wax baran weydo . . . . . . . . . . . .
8. Markaan guriga ku soo noqday . . . . . . . . . . .
9. Qofka aan wasakhda iska ilaalin . . . . . . . . . .
10. Wax baro inta . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . .

## BOOLIISKA



Booliisku waxa uu ka mid yahay ciidamadeenna qalabka sida. Ninka Booliska ahi waxa uu ilaaliyaa nabadgelyada dalka waddanka gudihiisa ku nool. Waxa uu soo qabtaa maxkamaddana geeyaa qofkii dembi gala. Dambiyada Booliisku ku xiri karo qofkii gala waxa ka mid ah tuugada, dilka, khiyaamada, dhaca, iwm.

Magaalooyinka waaweyn waxa jooga Booliis fara badan oo habeen iyo maalinba shaqeeya. Waxa uu u soo jeedaa oo uu u hawshoodaa si uu qofkii nabadda iyo xasilloonida wax yeelaya uu gacanta ugu dhigo. Booliisku waa lagama maarmaan, sidaa darteed dadka waxa looga baahanyahay in ay Booliska xishmeeyaan kalgacal goonniyana u qabtaan, haddii qof

dambi samaynaya aad aragtidna waxa habboon in aad si degdeg ah Booliiska ugu soo sheegtid.

Booliisku waa saaxiibka qofka wanaagsan ee nabad gelyada ka shaqeeya waana cadawga qofka xun ee dambiilaha ah.

**LAYLIS :**

**I. Weydiino :**

1. Booliisku muxuu qabtaa ?
2. Haddii aad aragtid qof wax xadaya maxaa kula gudboon in aad yeeshid ?
3. Shaqada Boolisku maxay kaga duwantahay ta Milatariga ?
4. Dharka Boolisku qaataa sidee buu u egyahay?
5. Yaa neceb Booliiska ?

**II.** (a) **Erayga «Booliis» waa magac wadareed.**
Magac wadareed waxa la yiraahdaa magac tira badan u taagan oo aan la jamcin karin. Masalan waa qalad haddii aynnu niraahno «Booliisyaasha», haddii aynnuu qof qura sheegayno iyo haddii aynnu dad badan sheegaynaba waxa aynnu oranaynaa «Boolis». Magacyada noocaas ah waxa ka mid ah: ari, geel, ido, shini, milatari, . . . . . iwm.

(b) Shanta magac wadareed ee kor ku yaal shan kale ku dar.

**III. Weedhahan erayga ku habboon u door oo raaci :**

1. Geelu xalay buu biyo soo (cabbeen, (cabbey).
2. Hashu way caano (Badan tahay) (Badan yihiin).
3. Shinnidu waxa ay (sameeyaan) (samaysaa) malabka.
4. Lo'du way (yartahay) (yaryihiin).
5. Booliisku dalkuu ka (ilaaliyaan) (ilaaliyaa) cadaawaha.

**IV. Eraydan hoos ku yaal erayo lid u ah keen.**

Sida : Qosol = oohin.

Bidix, madax, sii soco, macaan, fogaan, abaar, gu', aroor, foolxun, run.

## LAYLISYO :

**1. «Doonaa» u beddel sida weedhahan ku habboon :**

1. Wuu cabbi doonaa.
2. Way cabbi . . . . . . . . . . . .
3. Waannu cabbi . . . . . . . . . .
4. Waydin cabbi . . . . . . . . . . .
5. Waad cabbi . . . . . . . . . . .

**2. Weedhahan ku buuxi magac u yaallada ku habboon.**

1. Waan arki doonaa.
2. . . . . . . . . . . . . . arki doontaa.
3. . . . . . . . . . . . . . arki doontaan.
4. . . . . . . . . . . . . . arki doonaan.
5. . . . . . . . . . . . . . arki doonaa.

**3. Bedbeddel ereyga «doonaa» adiga oo sida saxa ah ugu buuxinaaya. Weedhaha hoos ku qoran.**

1. Cali fasalka Afraad buu u gudbi doonaa.
2. Caashi fasalka Afraad bay u gudbi . . . . . . . . . .
3. Cali iyo Caashi fasalka Afraad bay u gubi . . . . . . .
4. Aniga iyo Cali fasalka Afraad baannu u gudbi . . . .
5. Anigu fasalka Afraad baan u gudbi . . . . . . . . . . .
6. Adigu fasalka Afraad baad u gudbi . . . . . . . . . .
7. Idinku fasalka Afraad baad u gudbi . . . . . . . . .
8. Annagu fasalka Afraad baannu u gudbi . . . . . . .
9. Innagu fasalka Afraad bayanu u gudbi . . . . . . .
10. Ardaydu fasalka Afraad bay u gudbi . . . . . . . .

**4. Falka weedhahan ku jira u beddel sida habboon :**

1. waan seexanayaa.
2. waad . . . . . . . . .
3. wuu . . . . . . . . .
4. way . . . . . . . . .
5. waannu . . . . . . .
6. waynnu . . . . . . . .

7. waydin . . . . . . . .
8. aan . . . . . . . . . . .
9. aad . . . . . . . . . . .
10. ha . . . . . . . . . . .

5. **Weedhahan hoos ku qoran diidmo u rog :**

**TUSAALE :**

Cali wuu toosay.

Cali ma toosin.

1. Caashi waa ardayad.
2. Ilmuhu caano ayuu cabbaa habeenkii.
3. Ardaygu dugsiga ayuu aadayaa.
4. Gabadhani way quruxbadan tahay.
5. Cali waxa uu dhammeeyey fasalka saddexaad.
6. Bil waliba waa soddon beri.
7. Macallinku wuu sharxay casharkan.
8. Cumar wuu gudbay imtixaankii.
9. Wiilashan waan garanayaa.
10. faraskan ayaan fuulayaa.

6. **Magacyada hoos ku qoran raaci tilmaamo :**

**TUSAALE :** Nin weyn.


1. Naag . . . . . . . . . . . . .
2. Geed . . . . . . . . . . . . .
3. Libaax . . . . . . . . . . .
4. Wiil . . . . . . . . . . . . .
5. guri . . . . . . . . . . . . .
6. Buug . . . . . . . . . . . . .
7. Miis . . . . . . . . . . . . .
8. Shimbir . . . . . . . . . .
9. Qalin . . . . . . . . . . .
1. Macallin . . . . . . . . . .

**7. Buuxi meelaha bannaan weedhahan hoos ku qoran :**

1. Cali shalay buu Hargeysa u dhoofay.
2. Caashi . . . . . . . . . . . . . . . . . .
3. Anigu . . . . . . . . . . . . . . . . . .
4. Adigu . . . . . . . . . . . . . . . . . .
5. Idinku . . . . . . . . . . . . . . . . . .
6. Annagu . . . . . . . . . . . . . . . . .
7. Iyadu . . . . . . . . . . . . . . . . . .
8. Iyagu . . . . . . . . . . . . . . . . . .
9. Innagu . . . . . . . . . . . . . . . . .
10. Kuwani . . . . . . . . . . . . . . . . .

CASHARKA TOBAN IYO TODDOBAAD

## CADDO NIIDHIYA (Hees)



**Carradeenoo caafimaad iyo caano lagu daro**
**Cilmi barashaan ku caweynnaa, Caddo Niidhiya.**

**Cududdaydiyo caqligayga loo carbinayaa ciidda hooyo**
**Dhulka reeboo cirka gaar baan ku caweynnaa,**
**Caddo Niidhiya.**

**Hawd caleenliyo dhul cagaar loo man caddeeyaan**
**ku caweynnaa, caddo Niidhiya.**

**Waa cusaybiyo carro rogashiyo hab cuddoono lagu cayntee,**
**Caalankeennaan la cayaarraan ku caweynaa, caddo Niidhiya.**

**I. Erayada cusub.**


Caweys, cudud, ciiro, carbis, caddo niidhiya carro-rogasho, cuddoon.

**II. Weedhahan erayada hoos ku yaalla ku buuxi :**

bay, ku, u, loo.

1. Maxamuud dibadda ayuu . . . . . . . . ciyaarayaa.
2. Berri waxaa . . . . dabbaaldegayaa 21kii Oktoobar.
3. Caashi saaxiibaddeed . . . . . . . . . . la ciyaartaa.
4. Labadii inan waxa ay . . . . . . heshiiyeen in ay isa saamaxaan.
5. Cali iyo saaxiibkii waxaay . . . . . . . . .heshiiyeen Cumar.

## ASLUUBTA CIYAARTA



Maxamed iyo saaxiibadii waxa ay ahaayeen wiilal ciyaarta kubbadda cagta aad u jecel. Galab walba garoonka kubbadda ayay tegi jireen oo ay ku ciyaari jireen. Hase yeeshee, maalin iyaga oo garoonka ku sii socda ayay maqleen onkod roob. Way istaageen; waxa ay ka baqeen in uu roob helo haddii ay garoonka tagaan.

Iyaga oo walaacsan oo wax ay sameeyaan garan la' ayuu Maxamed ra'yi u soo jeediyey. Waxa uu yiri: «Maanta in aynnu kubbadda ciyaarnaa aad bay u fiicantahay, hase yeeshee, haddii aynnu garoonka tagno waxa hubaal ah in uu roob di'doono. Markaa aniga waxay ila tahay in aynnu maanta ciyaarta iska dhaafno». Inan kale oo Cali la yiraahdo ayaa hadlay oo yiri: «Aniga waxa ay ila tahay in aynnaan maanta ciyaarta dhaafin ee aan iskaga ciyaarno bannaankan innoo dhaw ee waddada baabuurta agteeda ah».

Labdii ra'yi ee Maxamed iyo Cali ay soo jeediyeen ayay wiilashii isku qabteen kii ay raaci lahaayeen. Badankoodii

waxa ay isku raaceen ra'yigii Cali uu soo jeediyey, dabadeedna kubbaddii bay qaateen oo ay bannaankii la tageen. Cabbaar markii ay ciyaartii socotey ayay kubbaddiika fakatay oo aay u tallawday waddadii baabuurta. Xirsi ayaa ka daba cararay. Markii uu kubbaddii gaarey ee uu gacanta ku-dhigay, ayaa gaari aad u ordayaa meel dhow kaga soo baxay. Xirsi markii uu arkay gaarigii oo in yar u soo jira ayuu muraara dillaacay oo uu hadba gees u cararay. Wadihii gaariga qudhiisu wuu naxay oo hadba dhinaca Xirsi u cararo ayuun buu gaariga u leexiyaa, ugu dambaynna gaarigii buu wiilkii jiirsiiyey. isla markiibana naftiibaa ka baxday Xirsi.

## LAYLIS :

### I. Weydiino :

1. Wiilashu maxay aad u jeclaayeen ?
2. Xagee bay kubbadda ku ciyaari jireen ?
3. Maxamed ra'yiguu soo jeediyey muxuu ahaa ?
4. Maxamed iyo Cali midkee baa ra'yi fiicnaa ?
5. Miyay habboon tahay in jidka baabuurta dhexdiisa ama agtiisa lagu ciyaaro ?

### II. Eraydan macnahooda sheeg.

Onkod, Ilatahay, Isku qabteen

Cabbaar, Muraara dillaacay, leexiyey, hadba,

Jiiray, baabuur, walaacsan.

### III. Weedho soo geli.

Cali qudhiisa, inyar, waxa ay ilatahay,

ugu dambaystii, waxa ay ku heshiiyeen,

## CIYAAR KUBBADEED



Berri Cabdi waxa uu tegi doonaa gegida ciyaaraha. Halkaa waxa ku ciyaari doona kooxda Horseed iyo Kooxda-Jeenyo. Waxaana ay kala heli doonaan koobka-horyaalka Dalka.

Inta aanu gegida tegin, Cabdi tigidh buu goosan doonaa. Dabadeedna saaxiibkii Yuusuf buu sii mari doonaa. Saaxiibkii haddii aanu diyaar ahayn, wuu sugi doonaa. Haddii uu diyaar yahayna halkaa ayay iska raaci doonaan.

Jidka waxa ay kula kulmi doonaan dad badan oo ciyaarta ku sii socda. Haddii ay dib u dhacaan waxa ay hubaan in ay gegida oo buuxda tegi doonaan, oo ay istaagi doonaan ama ay meel cadceed ah fariisan doonaan.

Haddii ay dhaqso u tagaanse waxa ay heli doonaan meel fiican oo ay fariistaan.

**LAYLIS :**

**I. Weydiino :**

1. Cabdi berri halkee buu tegi doonaa ?
2. Maxaa uu u tegeyaa ?

3. Yaa sii raaci doona ?
4. Haddii ay dhaqso u tagaan maxaa dhici doona ?
5. Haddii ay daahaan maxaa dhici doona ?

**II. Buuxi meelaha bannaan.**

Cabdi saaxiibkii buu sugi doonaa.

Anigu . . . . . . . . . . . . . . .
Adigu . . . . . . . . . . . . . . .
Isagu . . . . . . . . . . . . . . .
Annagu . . . . . . . . . . . . . . .
Iyadu . . . . . . . . . . . . . . .
Iyagu . . . . . . . . . . . . . . .

**III. «Doonaa» u beddel sida weedhahan ku hagaagsan.**

1. Wuu Cabbi doonaa.
2. Way Cabbi . . . . . . . . . .
3. Waannu cabbi . . . . . . . .
4. Waydin cabbi . . . . . . . .
5. Waad cabbi . . . . . . . . . .

**IV. Weedhahan ku buuxi erayga ku habboon :**

1. . . . . . . . arki doonaa
2. . . . . . . . arki doontaa.
3. . . . . . . . arki doontaan.
4. . . . . . . . arki doonaa.
5. . . . . . . . arki doonaan.

## NIN IYO WADAAD



Beri baa wadaad ari yar meel baadiya ah ku haysta ayaa nin u soo hoydey.

Wadaadkii ninkii si fiican buu u soo dhaweeyey, gogol wanaagsan ayuu ardaaga u dhigay. Wadaadku martigelinta ninka waxa uu ugu tala galay hilib, caano iyo bariid. Horta hilibkii ayuu u qaaday. Markii uu soo noqday buu arkay ninkii oo hilibkii wada cunay oo dhammayey. Caanihii buu hordhigay markaasuu haddana gurigii ku noqday si uu bariiskii u soo qaado. Markii uu soo noqday waxa uu arkay ninkii oo caanihii laacay. Bariiskii buu hordhigay markaasuu gebigiisiiba laba jeer qaatay. Wadaadkii ninka cir weynidiisii iyo dhakhsihii uu wax u cunaayey ayaa fajac iyo yaab gelisey, markaasuu ku yiri: «War xageebaad ku socotaa ?»

**Ninkii :** «Cusbataalka magaalada.»

**Wadaadkii :** «Oo maxaad ka doonaysaa ?»

**Ninkii :** «Nin dhakhtar ah oo wanaagsan baa la iigu shegay.»

**Wadaadkii :** «Oo miyaad bugtaa ?»

Ninkii : «Haa.»

Wadaadkii : «Maxaa ku haya ?»

Ninkii : «Cuntada ayaanan badanaaba nafsadu qaban, markaa waxa aan doonayaa in uu dhakhtarku i siiyo dawo cuntada ii furta».

Wadaadkii baa qosol kaga kacay. Markaasuu yiri: «Walaal waxaan kaa baryayaa in aanad i soo marin marka aad dhakhtarka ka soo noqotid ee soortu kuu furanto!»

**I. Weydiino :**

1. Wadaadku xaggee buu degganaa ? Muxuu ku haystey ?
2. Markii ugu horreysey muxuu wadaadku ninka siiyay ?
3. Markii uu wadaadku caanaha keenay muxuu arkay ?
4. Ninku xaggee buu ku socdey ? Muxuu ka doonayey ?
5. Muxuu wadaadku ninka ka codsaday ?

**II. Erayga «Si» laba macno ayuu leeyahay:**

i) Waxa uu muujiyaa ujeeddada wax la qabtay looga dan leeyahay, sida Maxamed suuqii buu tegey si uu u arko aabbihii.

«Si» Waxa ay caddaynaysaa ujeeddada uu Maxamed ka lahaa tegista suuqa. Taasoo ah in uu arko aabbihii.

ii) «Si» marka kale waxa ay la macna tahay «hab» ama dariiqo wax loo qabto, sida: Baruhu si fiican buu wax noogu dhigaa.

«Si» Hadda waxa ay wax ka sheegaysaa sida baruhu ardayda wax ugu dhigo.

**III. Meelaha bannaan buuxi.**

1. Wadaadkii aqalkii buu ku noqday si . . . . . . . . .
2. Cali eraygaa si . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . .
3. Inantu waxa ay doonaysaa in ay dadaasho si . . . .
4. Arrintu sidaa maahee waa si . . . . . . . . . . . . .
5. Berri magaalada ayaan tegayaa si . . . . . . . . . . .

**IV. Erayadan hoos ku dhigan liddigood keen :**

Sida : Buur = Bannaan

hor, nacayb, weydiin, yar, caddaan. caafimaad, jiif,

seexo, kulayl, xumaan, haa, cir.

**V. Erayada ay xariijintu hoos marsantahay kuwo la macno ah ku beddel.**

1. Yuusuf saaka wuu bukaa.
2. Markuu caanihii laacay buu seexday.
3. Saaka xaggee baad tegaysaa ?
4. Walaalkay waxa uu iga codsaday in aan ka aammuso marka uu wax akhriyaayo.
5. Ardaygu waa in uu barihiisa xushmeeyaa.

## CUMAR BEENAALE



Waxaa jiray wiil reerkooda ariga u raaci jirey. Maalin maalmaha ka mid ah ayuu isaga oo ariga la jooga qaylo dheer ku dhuftay, «Waar Hayaay ! Waa Waraabe ! Waar Hayaay ! Waa Waraabe ! Waar Hayaay ! Waa Waraabe !» Dad farabadan baa markiiba u soo gurmadey.

Mid ul sita; mid waran sita iyo kuwa kale oo billaawayaal sita. Markii ay meeshii yimaaddeen ayey arkeen arigii oo si wanaagsan isaga daaqaya; wax dugaag ah oo meeshii joogaana ma ay arag. Wiilkii bay weydiiyeen waxa qaylada ka keenay. Markaasuu intuu qosol ku dhuftay yiri, «Waa beentay, waan iska ciyaarayay!».

Dhawr maalmood oo dambe ayuu Cumar sidaas oo kale dadkii u soo luggooyey; markay ogaadeen in uu Cumar beenaale yahay ayay ku tashadeen in aanay maalin dambe u gurmanin haddii uu qayliyo.

Maalintii dambe ayuu arkay wixii uu saahadinayey! Arigii uu la joogey ayuu waraabe soo weeraray. Markaasuu qaylo ku dhuftay, «Waar Hayaay ! Waar Waraabe!» Ilayn waa nin

been lagu bartaye, qofna qayladiisi **dheg uma dhigin.** Waraabihiina halkii buu arigii badh ku **laayey.**

LAYLIS :

**I. Weydiino.**

1. Cumar muxuu reerka u qaban jirey ?

2. Maalintii ugu horreysey uu qayliyey muxuu arkay ?

3. Kolkii ay dadkii warsadeen muxuu Cumar sameeyey ?

4. Markii uu dhawr jeer Cumar sidii oo kale sameeyey maxaa dadkii ay ogaadeen ?

5. Maxaa dhacay maalintii uu dhab ahaan waraabuhu u soo weeraray arigii uu Cumar la joogey ?

**II. Erayga «Jiray» ku Buuxi Weedhahan adiga oo u beddelaya kolba sida habbon ee uu weedha u raacayo.**

1. Wiil baa ari raaci . . . . . . . . . . . . . .

2. Gabar baa ari raaci . . . . . . . . . . . . .

3. Cali iyo Cabdi baa ari raaci . . . . . . . .

4. Anigaa ayaa ari raaci . . . . . . . . . . . .

5. Adiga ayaa ari raaci . . . . . . . . . . . .

6. Innaga ayaa ari raaci . . . . . . . . . . . .

7. Idinka ayaa ari raaci . . . . . . . . . . . .

**III. Weedhahan Isku xiradiga oo soo gelinaya «Na».**


**TUSAALE :** Wiilku caanuu cabbey. Bariis wuu cunay.
Wiilku caanuu **cabbey,** bariisna wuu cunay.

1. Baruhu casharkii buu sharaxay. Wuu akhriyey.
2. Wiilku waraabuu arkay. Wuu qayliyey.
3. Dadkii way soo yaaceen. Waraabe may arag.
4. Casharkii buu akhriyey. Su'aalihii wuu ka wada jawaabey.
5. Casharkii buu fahmay. Layliskii wuu ka wada shaqeeyey.

**IV. Buuxi Meelaha Madhan.**

1. Arigii buu ilaalinayaa.
2. Arigii bay . . . . . . . . . .
3. Arigii baannu . . . . . . . .
4. Arigii baynnu . . . . . . . .
5. Arigii baad . . . . . . . . .
6. Arigii baydin . . . . . . . .
7. Arigii baan . . . . . . . . .

## SHABEEL IYO LABA SAAXIIB



Laba wiil oo saaxiib ah ayaa kayn dhex galay, mid baa ku yiri kii kale, «Haddii aynnu dugaag aragno, anigu kaaga carari maayo ee waan kuu kaalmaynayaa.» Markaasu kii kale yiri, «Aniguna sida si le'eg baan kuugu gargaaraya haddii uu bahal inaa soo weeraro».

Muddo yar dabadeed ayay, maqleen ci dheer hareerahooda haddii ay wax yar eeg-eegeen, waxa ay arkeen shabeel in yar u soo jira. Wiilashii mid baa markiiba cararay. Kii kalena geed buu fuulay. Markii uu geedkii fuulay ee uu dhexda marayo ayuu soo dhacay. Dabadeed waxa uu arkay shabeelkii oo in yar u soo jira. Wuu fekerey, waxa uu ku tashaday in uu jiifsado oo indhaha isku qabto si uu shabeelku u moodo meyd. Shabeelkii inta uu wiilkii dul yimid ayuu meel walba ka ursaday. Markii uu ka waayey meel dhaqaaqda ayuu iskaga tegey. Kii kale

oo isna isla markiiba geed u dhaw fuulay ayaa geedkii ka soo dhaadhacay, markaasuu saaxiibkii ku yiri, «Waar muxuu shabeelku kuu sheegayey markii uu afka dhegta kuu saaray ? Maarkaasuu yiri, «Waxa uu i yiri, ha raacin saaxiibada kaa cararaya marka aad kaalmadooda u baahantahay».

LAYLIS :

**I. Weydiino.**

1. Maxay labada wiil ku heshiiyeen ?
2. Wiilashu maxay arkeen ?
3. Wiilashu markii ay arkeen shabeelka maxay sameeyeen ?
4. Wiilkii geedka ka soo dhacay sidee buu shabeelkii uga nabad galay ?
5. Kii geedka fuulay markii uu soo daadegey muxuu saaxiibkii weydiiyey ?
6. Muxuu shabeelku wiilku u sheegay ?

**II. Eraydan weedho soo geli :**

Weerar, Kaalmayn, ursaday, heshiiyey, jiifsaday.

**III. Dhammee weedhahan hoos ku qoran:**

1. Imtixaanka waan gudbi lahaa, haddii . . . . . . . .
2. Marka aan magaalada tagaba . . . . . . . . . . . .
3. Aniga oo ka tallaabaya jidka . . . . . . . . . . . .
4. Tani waa inantii . . . . . . . . . . . . . . . . . .
5. Intaanan casharka billaabin . . . . . . . . . . . . .

CASHARKA LABAATAN IYO SADDEXAAD

**LAYLIS :**

**I.** Gacantaada midig biyo geli, ta bidixna jeebkaaga geli, kolka aad labadoodaba soo saartid ee aad hawada u dhigtid iyamaa qabow ?

Waayo ?

II. Maxaa dadku uu u dhididaa marka uu shayqaynayo ?

III. La soo bax qalin iyo xaashi.

Adiga oo aan qalinka xaashida ka dul qaadin, xariijin gaaban hoos u soo jeex, mid gaaban dhinaca midigta u jeex; mid kale oo gaaban kor u jeex; mid kale oo gaaban isugu xir.

Sawirkaagu ma la mid yahay ka saaxiibkaa ? Sheeg magaca sawirka.

**IV.** Waxa jira saddex xeero, mid cagaar ah, mid guduud ah, mid madaw ah. Ta madoobi way dheertahay, biyo ayaana ka buuxa. Ta cagaarni way qara yar tahay wayna gaabantahay, caano ayaa ka buuxa. Ta guduudani iyana way gaabantahay waase qara weyntahay, waxna kuma jiraan. Haddaba eraygee baa sax ka dhigay weedhan :

1. Caano waxaan ka heli karaa xeerada (cagaran, qarada yar, madaw).

2. Biyuhu way ku jiraan xeerada (gaaban, qarada yar, dheer maran).

3. Waxba kuma jiraan xeerada (guduudan; madaw; cagaraan).

4. Xeerooyinka (mid; laba; saddex) baa gaaban.

V. **Erayadan hoos ku qoran xarfaha geli kara ku dar :**

**TUSAALE :** L. baax = Libaax

| | | | |
|---|---|---|---|
| 1. | B—g. | 11. | G—bar. |
| 2. | N—n. | 12. | T—mo. |
| 3. | M—lin. | 13. | S—n. |
| 4. | Saa—ad | 14. | Cadcee— |
| 5. | Kay— | 15. | C—r. |
| 6. | Gu—uud. | 16. | dh—l. |
| 7. | fa—al. | 17. | bi—o. |
| 8. | ca—ar. | 18. | shaa— |
| 9. | xaa—i. | 19. | d—riis. |
| 10. | ga—an. | 20. | du—si. |

## NEBI MAXAMED

Nebi Maxamed, nabad gelyo iyo naxariisi korkiisa ha ahaatee, waxa uu ahaa nin Ilaahay doortay. Wuxuuna u doortay inuu Diinta Islaamka dadka gaarsiiyo, caddaan iyo madowba. Nebi Maxamed waxa uu lahaa tilmaamo badan oo wanaagsan : hadal fiican, naxariis badan, dulqaad weyn iyo tilmaamo kale oo farabadan oo lagaga dayan karo.

Dadku hadalkiisa kama ay xiisa go'i jirin. Had iyo jeerna dadka wax wanaagsan buu u sheegi jirey. Weligiis kama aanu hadal waxaan dani ugu jirin isaga iyo ummaddiisaba. Wuxuuna oran jiray, «Qofku ama waa inuu wax khayr leh ku hadlaa ama waa in uu iska aammusaa.»

Nebigu aad buu u naxariis badnaa. Dadka qofkii dhibaataysan wuu u kaalmayn jirey. Hadduu arko nin qof kale ku gardarroonaya wuu qaban jirey. Hadduu arko qof gaajaysan, waxa uu haysto ayuu wax ka siin jirey.

Nebi Maxamed, aad buu u dulqaad badnaa, qofkii xumaan ku sameeya isla markiiba kama uu aargoosan jirin ee wuu u dulqaadan jirey. Si deggan oo fudud buu qofka gefkiisa ugu sheegi jirey. Marka uu qofku dembigiisa qirtana wuu saamixi jirey.

**LAYLIS :**

**I. Weydiimo :**

1. Nebi Maxamed dadkee buu ka dhashay ?
2. Nebiga Ilaahay muxuu u doortay ?
3. Sheeg seddex wax oo uu Nebigeennu ku tilmaannaa ?

**II. U fiirso saddexdan eray ee hoos ku yaalla sida micnahoodu uu u kala duwanyahay :**

U doortay. Ku doortay. Ka doortay

1. Ilaahay Nebi Maxamed waxa uu **u doortay** in uu Diinta Islaamka dadka gaarsiiyo.

2. Cali kabahan fudaydka ayuu **ku doortay.**

3. Saacadihii dukaanka yaalley tii ugu wanaagsanayd baan **ka doortay.**

**III. Weedhahan hoos ku qoran isku dar oo weedh qura** ka **dhig.**

**Tusaale :** Kani waa inan. Hooyadii shalay bay dhimatay.

Kani waa inankii hooyadii ay shalay dhimatay.

1. Waa tan bisaddii. Caanahaygii bay cabtay.


2. Waxa uu tegey meeshii. Meesha libaax baa fadhiyey.

3. Cali baan arkay. Wuu cararaayay.

4. Kitaabku miiska ayuu kor yaalla. Kitaabka anigaa leh.

5. Xasan waa nin dheer. Wuu madawyahay.

## XOOLAHA



Soomaalidu waa saddex qaybood : Xoolaley, beeraley iyo reer magaal. Xoolaleyda ayaa ugu badan. Xoolahennu waa geel, lo' iyo ari.

Soomaalidu badanaaba geela ayay xoolaheeda ugu jeceshahay waanay ku faantaa. Waayo isagu xoolaha, kale wuu uga adkeysi badan yahay harraadka iyo gaajada. Lo'du saddex casho wax ka badan biyaha kama qadi karto. Ariguna toddoba wax ka badan isna biyaha kama maarmi karo Hase yeeshee, geelu waxa uu biyaha ka maarmi karaa ilaa labaatan casho.

Lo'du marka ay barwaaqo haysato way wanaagsan tahay geelana way ka caano badan tahay wayna ka subag badan tahay. Intaa waxa u sii dheer geela way ka saan wanaagsan tahay saanteedana waxa laga sameeyaa waxyaalo badan oo lagama maarmaan ah.

Arigu waxa uu u qaybsamaa ido iyo riyo. Idaha Soomaaliyeed waxa ay caan ku yihiin madax madow. Riyaha iyo idahaba caanaa laga helaa, hilibkoodana waa la cunaa waana laga jecelyahay ka lo'da iyo geelaba.

LAYLIS :

**I. Weydiino :**

1. Dadka Soomaaliyeed immisa ayay noloshoodu u qaybsantahay ?

2. Xoolaha aynnu dhaqanaa waa immisa nooc ?

3. Soomaalidu maxay geela uga jeceshahay xoolaha kale ?

4. Lo'du goormay ka fiican tahay geela ? Maxay kaga fiican tahay ?

5. Lo'da iyo ariga midkee baa subag badan ?

**II. Ma taqaan macnaha erayada hoos ku qoran ?**

Nirig, Sac, waxar, sabeen, maqal, orgi, ceesaan, nayl, lax, sumal.


**III. Erayada hoos ku yaalla waa keli ee jamac ka dhig :**

Wan, War, ri', waraabe, lax, dameer, orgi, oday, awr, sac, dibi, Nayl, gu', hadal, waxar.

**IV. Isku hagaaji weedhahan qaybahooda :**

| | | |
|---|---|---|
| 1. Waxartu rida | waan | Akhriyayaa |
| 2. Inanku buug | waxa ay | irmaan yahay |
| 3. Sacu | buu | jaqdaa |
| 4. hashaydii | way | dhashay nirig |
| 5. Anigu Maxamed | wuu | ka weynahay |

# MUUSKA





Muusku waxa weeye miro macaan badan, midabkiisuna waa woob (hurdi). Waxa uu ka baxaa dalalka cimilada kulul ee biyaha badan leh. Soomaaliya waxa ka baxa muus dhawr jaad ah, waxaase u badan laba nooc: midka lagu magacaabo «Jubba» iyo kan la yiraahdo «Booyow». Geedka uu muusku ka baxo waxa uu dhererkiisu gaarayaa ilaa saddex mitir.

Waxa uuna leeyahay caleen balbaalaaran oo dhaadheer. Muusku waxa uu ku bislaadaa sagaal bilood. muddadaas dabadeed ayaa la goostaa oo la cunaa.

Muuska waxa laga beeraa dalal badan. Maxa yeelay aad baa loo jecel yahay oo loo cunaa. Muusku waxa uu ka mid yahay miraha jirka dadka qiimaha u leh.

Soomaaliya laba gobol ayuu muusku uga baxaa. Gobolka Shabeelaha Hoose oo uu maro Webiga Shabeelle iyo Gobolka Jubbada Hoose oo u maro Webiga Jubba. Xagga dhaqaalaha haddii aynnu ka eegno muusku waxa uu ka mid yahay wax yaalaha aynnu debedda u dhoofinno oo aynnu lacagta badan ka hello. Dalalka Soomaaliya muuska ka qaata waxa ka mid ah ka Talyaaniga, Jarmalka iyo dalal badan oo Carbeed. Dawlad-

da kacaanka ah waxa ay aad ugu dadaashey sidii muus badan dalka loogu beeri lahaa dabadeedna suuq loogu heli lahaa.

LAYLIS :

**I. Weydiino :**

1. Muuska midabkiisu waa maxay?
2. Immisa bilood buu ku baxaa ?
3. Webiyada Juubba iyo Shabeelle xaggee bay mara-an ?
4. Ma taqaan khudradaha hoos ku qoran :
   Mafafay, Cambe canab, Bocor, Qaro.

**II. Erayadan hoos ku qoran weedho soo geli.**

Cimilo, qiime, maxa yeelay, dhoofay, dedaashaa.

**III. Weedhahan hoos ku qoran dhamaystir :**

1. Muusku waxa uu . . . . . . . . . . . . . . . . . .
2. Anigu Maxamed waan . . . . . . . . . . . . . . . .
3. Shalay baan magaalada . . . . . . . . . . . . . . . .
4. Baabuur baa dorraad . . . . . . . . Jidka Afgooye.
5. Biyo badan baa dooxa . . . . . . . . . . . . . . . . .

# GALLEYDA





Geedka galleyda aynnu niraahnaa magacyo kala geddisan baa dunida looga yaqaannaa. Dalkeenna oo keliya laba magac iyo in ka badan buu ku leeyahay: «galley», «arabikhi». Galleydu waxa ay si fiican uga baxdaa dhulka kulul oo roobka b[illegible] danna hela.

Kolka miraha galleyda la beero ayuu xidid hoos uga baxaa oo uu dhulka galaa. Korna waxa ka soo baxa jirridda. Marka ay jirriddu kor u sii dheeraatoba, xididdaduna hoos bay u sii b[illegible] xaan. Marka geedka koritaankiisu buuxsamo, xidid[illegible] rerkoodu waxa uu noqdaa afar fuudh, jirriddana lix fuud iyo dheeraad bay noqotaa.

Maalintii, marka ay cadceeddu kulushahay [illegible] leydu hoos bay u foororsataa: ha[illegible]

hayna kor bay u toostaa. Kolka sabuulku uu bislaado wuu engegaa oo hurdi ayuu noqdaa, firridaku taallaana way engegtaa oo way adkaataa. Geedka oo dhammi faa'iido ayuu inoo leeyahay. Firrida innaga ayaa cunna, caleenta iyo jirriddana xoolaha ayaa cuna.

## LAYLIS :

### I. Weydiino :

1. Dhirta galleyda jirridda iyo xididka kee baa soo hor baxa ?
2. Xididka iyo jiriddu ma kor bay u baxaan, mise hoos mise dhinacyada ?
3. Kolka geedka korriimadiisu ay buuxsanto, ma waxa uu leeyahay jirrid iyo xidid keliya mise wax intaa ka badan buu leeyahay ?

### II. Erayadan ku buuxi meelaha bannaan :

aan, aad, aydin, uu, ay, aynnu.

**Tusaale :** Galleydu kolka **ay** baxdo, cunnaa laga dhigtaa.

1. Kolka . . . . . . . fahanmo casharka ayaynnu weydiinaha ka jawaabi doonnaa.
2. Kolka . . . . . . . tago dugsiga, ayaan wax akhrisan doonnaa.
3. Kolka . . . . . . . iskaa-wax-u-qabso aad ku shaqaynaysid, waa in aad is xilqaantaa.
4. Kolka . . . . . . . Soo baxo Cali, aniga ayaa la hadli doona.
5. Kolka . . . . . . . tukanaysaan, waa in aydin weyseysataan.
6. Kolka . . . . . . . timaaddo Caashi, abaalgud baan siin doonnaa.

III. **Weedhan ku buuxi «Ka» ama «Ku»**

**Tusaale** : Miruhu jirridda ayey **ka** soo baxaan

1. Jirridda caleen iyo sabuul baa . . . . . soo baxa.
2. Dad baa beeraha . . . . . . .qoda cagafcagaf.
3. Waxa aan . . . . . . fariistaa kursi.
4. Aroor kasta waxa uu . . . . .yimaadaa Degmada Hodan.
5. Geeduhu waxa ay . . . . . baxaan carrada, biyaha iyo qorraxda.

IV. **Weedhahan ku buuxi «sii» ama «soo».**

**Tusaale** : Kolka uu geedku **sii** koraba jirridduna kor bay u **soo** baxdaa.

1. Cali suuquu ku . . . . . . . . . . . . . . socdey.
2. Fasalka ayaan . . . . . . . . . . . fadhiyey markii ay ardaydu . . . . . . . . . . . galeen
3. Marka aad . . . . . socotid dhabarkaaga muuqda, marka aad . . . . . socotidna laabtaadaa muuqata.
4. Shaar baan . . . . . . . . siistay toban shillin, :a baddedna waxa aan . . . . . . . . . . siiyey sag... shilin.
5. Cali dugsiga sare ayuu u wareegayaa san nadka . . . . . . . . . . . . socda.

## CASHARKA LABAATAN IYO SIDEEDAAD

## WARAAQAHA



Maxamed waa inan fasalka Saddexdaad ee Dugsiga Hoose ee Jawhar ku jira. Warqadaha wuu qori yaqaan. Maxamed saaxiibkii Cali buu saaka warqad u diray. Cali Waxa uu ku jiraa Dugsiga Hoose ee Qurac Dheer ee ku yaalla magaalada Hargeysa. Bal eeg sidu uu u qoray :

Dugsiga Hoose ee Jowhar,
G. shabeelada dhexe.
24.9.1974

Jaalle Cali,

Warqaddii aad ii soo dirtay shalay baan helay. Aad baanad ugu mahadsantahay. Anigu aad baan u caafimaad qabaa, lugtii aan ka jabayna way ii bogsatey.

Hooyadey iyo Aabbahayba way caafimaad qabaan. Wayna ku soo salaamayaan.

Saaxiib, waxa aan rabaa in aad fasaxa noo timaaddid oo aad nala joogtid. Hooyaday iyo Aabbahayba waa aan u sheegay in aad noo imanaysid, aad bayna ugu farxeen. Maxaa kula tahay ? Jawaab deg-deg ah baan saaxiib kaa sugayaa.

Sidaa iyo nabadgelyo.
Saaxiibkaa,
Maxamed.

Maxamed markii uu warqaddii dhammeeyey, gal buu ku ridey. Wuu xiray, galkiina dusha waxa uu kaga qoray cinwaankii Cali. Dabadeedna wuu qaaday oo boosta ayuu ku ridey. Bal eeg sida uu cinwaanka u qoray :

Cali Rooble,
Dugsiga Hoose ee
Qurac Dheer, Hargeysa.
G. Waqooyi-Galbeed.

LAYLIS :

I. **Weydiino :**

1. Maxamed dugsigee buu ku jirey ?
2. Cali iyo Maxamed maxay isu yihiin ?
3. Goormuu Maxamed warqadda diray ?
4. Halkee baa tigidhada-galka lagaga dhejiyaa ?
5. Adiga oo Cali iska dhigaaya Maxamed u dir jawaab.

II. **Warqad u qor Saaxiibkaa (ama saaxiibaddaa).**

Marka aad qoraysid warqadda u fiirso meesha aad ku qoraysid cinwaankaaga, ka saaxiibkaa iyo halka aad ku dhigaysid taariikhda.

**III. U fiirso labadan weedhood:**

1. **Xasan shimbir buu diley shalay.**

2. Shimbir baa la dilay shalay.

Weedha hore shimbirta **waxa diley** waa la garanayaa:


Waa xasan. Marka, isaga waxa aynnu oranaynaa fale, waayo isaga weeye ka wax falay ee shimbirta diley. Weedha labaad shimbirta waxa diley ma naqaan. Marka; waxa aynnu oranaynaa weedhan falaheedu waa qarsoon yahay.

Weedhahan hoos ku qoran ee falahoodu muuqda u rog kuwo falahoodu qarsoon yahay.

**Tusaale :** Xasan baa kabahaygii tuuray: Kabahaygii wa la tuuray.

1. Maxamed waraaq buu diray.
2. Caanihii bisad baa cabtey.
3. Isagaa daaqadda xiray.
4. Ibraahim baa inantan diley
5. Kitaab bay hooyaday i siisay.

## BOOSTA




Boostu waa Xafiiska dadka wararka u kala tebiya. Marka aad doonaysid qof meel kaa fog ku nool in aad war u dirtid, boosta ayaad warqad ugu rideysaa, haddii meesha qofku uu ku nool yahay ay boos leedahay.

Warqadda inta aanad boosta geynin gal baad ku ridaysaa. Galkaas dushiisa waxa aad ku qoreysaa cinwaanka. Cinwaanku waa magaca qofka aad u diraysid warqadda iyo meesha uu ku nool yahay ama laga helo. Warqadda marka aad dhammaysid boosta ayaad geyneysaa. Tigidh baad dabadeed ka iibsanaysaa boosta. Tigidhka waxa aad ku dhejineysaa galka dushiisa dacalka midig ee sare. Intaas dabadeed waad qaadaysaa oo waxaad ku rideysaa sanduuqa yar ee ku samaysan derbiga boosta.

Marka ay waraaqo badani sanduuqa ku ururaan baa la qaadaa, dabadeedna waxa loo kala diraa mid waliba meeshay ku socoto.

Boostu waraaqaha oo keliya ma qaaddo ee waxa kale oo lagu dirsadaa lacagta, alaabada iyo taararka. Boostu aad bay u faa'iido badan tahay. Wixii loo dhiibtona ma lumiso.

## LAYLIS :

### I. Weydiin :

1. Boosta faa'iidadeedu waa maxay ?
2. Cinwaanku waa maxay ?
3. Warqadda marka sanduuqa yar ee boosta lagu rido sidee baa la yiraahdaa ?
4. Weligaa warqad boosta ma ku dirtay ?
5. Ka sheekee waraaq aad dirtay; ka bilaw markii aad qalinka iyo waraaqda aad isu qaadday ilaa ay gashay gacanta qofkii aad u diraysey.

### II. Dhammee Weedhahan :

1. Cali Imtixaanka gudbi maayo, haddii . . . . . . .
2. Haddii aan roob di'in, . . . . . . . . . . . . . . . . .
3. Haddii aan shalay magaalada tago, . . . . . . . . . .
4. Berri haddii aad magaalada tagtid . . . . . . . . .
5. Haddii aan imtixaanka gudbiwaayo, . . . . . . . .

### III. Meelaha Madhan Ku Buuxi Erayada Hoos Ku Qoran :

Hoos, ag, ka, ku, dhex, kor, hor, daba.

1. Waxa aan arkay nin geed . . . . . . . . . . Jiifa
2. [illegible]gu bisada wuu . . . . . . . . . . . . . . baqaa.
[illegible] Dayee[illegible] baa saaka magaalada . . . . . . . maray.

4. Waddadu waxay . . . . . . martaa laba buurood.

5. Xooluhu waxay . . . . . . . badan yihiin dhulka barwaaqada ah.

6. Libaax baa xalay reerkeenna . . . . . . . . . maray.

7. Saaka markii aan dugsiga ku socdey waxa iga . . . yimid aabahay.

8. Galabta waxa aan arkay ey yar oo hooyadii . . . . . socda.

## IV. Erayadan Tilimaamayaal u Beddel :


Hoos, ag; dhex; kor; dul, hor, daba.

**Tusaale :**

Hoos, hoostiisa, hoosteeda, hoostayada, hoostooda, hoostaada, hoosteenna, hoostiinna.

CASHARKA SODDONAAD

# GARGAARKA DEGDEGA AH




Haddii uu maska sunta lihi qaniino saaxiibkaa sidee baad ugu gargaari lahayd?

1. Ka jooji qofka masku qaniinay wax alla wixii dhaqdhaqaaq ah, gaar ahaan ka ay muruqyada jirkiisu samaynayaan.

2. Xarig ku giiji barta uu masku qaniiney dusheeda. Haddii aad si fiican u xirtid dheecaan yar baa ka soo baxaya nabarka.

3. Mindi aad afkeeda ku diirisay olol kabriid ama dab kaleba dul saar inta meelood ee maska micidiisu ay gaartay.

4. Isticmaal jiqid. Waxa aad ku jiqi kartaa afkaaga ama waxa aad ku toobi kartaa koob. Sunta masku waxba yeeli mayso calooshaada haddii ay in yari kugu siibato markaad nuugtid. Hase ahaatee, waxa mar walba wanaagsan in aad ka luqluqatid. Jiqiddu ama toobiddu ha socoto hal saac ama in ka badan. Marka aad jiqidda dhamaysid iyo jiqidda dhexdeedaba dul dhig nabarka baraf ama ku shub biyo qabow; taasi xanuunka ayay yaraynaysaa suntana baahiddeeda way dhimaysaa.

5. Marka aad intaa samaysid gee qofka meesha ugu dhaw daryeel caafimaad. Haddii gaadiid uu lagama maarmaan noqdo, jiifi qofka. Dhinaca masku ka qaniinayna ha ka hooseeyo jirka intiisa kale, dabadeedna gaadiid u doon.

**LAYLIS :**

Sawirada hoos ku qorani sidaay u kala horreeyaan isugu xijisii.

## LAYLISYO :

**I. Hadaladan ka samee siddeed iyo toban weedhood :**

| | |
|---|---|
| Arday kasta oo fasalkan ku jiraa wuxu leeya-hay, Cali isagu ma haysto | Buug cusub. |
| Ardayda fasalkan midna ma haysto; | qalin. |
| wiil walba waxa la siiyey | kabo |
| Caasha weli lama siin | |
| Gabdhaha kale mid walba waxa la siieyey | |

**II. Maanta waa khamiis. Shalay Cali suulkuu is gooyey.**

laba maalmood horteed caashi waxa ay tolatay toob cusub. Saddex maalmood horteedna Cali waxa ka lumay surwaal.

Afar maalmood horteedna dugsigaa la xiray.

**Weydiino :**

2. Maalintee bay Caashi toobkii cusubaa tolatay ?

3. Maalintee baa dugsiga la xiray ?

4. Maalinma ayuu surwaalku Cali ka lumay ?

**III. Eray waliba meesha uu ku habboon yahay geli :**

Khudrad, baal, cayayaan, dad, sac, libaax.

| | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|
| Kalluun | nin | iniin | dibi | maroodi | jiir |
| xayawaan | naag | ubax | ri' | mas | timo |
| shimbiro | ilmo | geed | wan | shabeel | ciddi |

## III. Garasho :

Caasha, Mary an, Cumar, Cabdi, iyo Luul, ayaa kuraasi siman fasalka hortiisa ku fadhiya. Cumar safka geesta midig buu ka fadhiyaa, cabdina geesta kale. Caashi waxay ay fadhidaa Cumar midigtiisa. Maryana waxa ay ku xigtaa Cadi.

1. Safka bartankiisa yaa fadhiya ?
2. Immisa gabdhood ayaa u dhexeeya Cumar iyo Cabdi ?
3. Yaa dhex fadhiya Cumar iyo Caasha ?
4. Yaa dhex fadhiya Caasha iyo Cabdi ?
5. Cumar ya midigta ka xiga ?

## CASHARKA SODDON IYO LABAAD

# SAYID MAXAMED CABDULLE XASAN



Sayidku waxa uu ku dhashay Ceel la yiraahdo «Sac-Madeego» oo Degmada Buuhoodle ee Gobolka Togdheer ka mid ah. Aabbihii iyo awoogiiba waxa ay ahaayeen niman culimo ah oo diinta ku xeel-dheeraaday dadkuna aad u maamuuso. Isla markii uu socod bartey, Sayid Maxamed waxa ka muuqatey, fahmo badnaan, firfircoonaan, iyo maskax wanaag. Lix jir kolkii uu ahaa ayaa aabihii dugsi-Quraanka geeyey halkaas oo Kitaabka Quraanka ah uu kor kaga qabtay. Markii uu Quraanka dhameeyey Sayidku macallinkiisii ayuu kaaliye u noqday, hase yeeshee waxbarashadisii buu halkeedii ka sii watey ilaa uu macallin ka noqday da'diisu markii ay sagaal iyo toban ahayd.

Sayidku caado uma uu lahayn in uu meel iska fadhiyo ee waxa uu u safri jirey hadba meeshii cilmi loogu sheego. Waxa uu hadba dal u dhoofaba, waxa uu markii ugu dambeysey tegey magaalada Maka. Halkaas oo uu kula kulmay nin Sheekh ah oo Maxamed Saalax la oran jirey wax badanna uu ka faa'iideystey.

Sayidku waxa uu caan ku ahaa dal iyo diin jeclaan, waxa uuna si lama illaawaan ah uu u necbaa gumeysiga iyo gaalada. Sayid Maxamed markii uu ogaadey in dawlado shisheeye ahi dalkii Soomaaliyeed ay qaybsadeen, ayuu isaga oo Maka jooga goystay in uu dawladahaas dagaal ku qaado, dabadeedna waxa uu la tashaday ballan adagna la dhigtey saddex iyo toban Xaaji oo Soomaali ah, waqtigaasna Maka joogey.

Markii uu Soomaaliya ku soo noqday ayuu Sayidku dagaal

gobanimo doon ah abaabuley, waxa uuna jahaadkaas wadey muddo dheer oo dhawr iyo labaatan sannadood ah.

Sayidku waxa uu ahaa nin gabayaa ah, diintana aad ugu xeeldheer, waxana intaas u dheeraa aftahammanimo.

Sayid Maxamed waxa uu ku dhintay magaalo la yiraahdo «Iimay» sannadku markii uu ahaa 1921, ka dib kolkii u jidka gobanimo doonka dadkiisa u horseeday.

LAYLIS :

I. **Weydiino :**

1. Xagee buu Sayidku ku dhashay ?
2. Sayidku immisa jir buu ahaa markii uu Quraanka kor ka qabtay ?
3. Muxuu Sayidku caan ku ahaa ?
4. Markii Sayidku uu Soomaaliya ku soo noqday muxuu sameeyey ?
5. Goormuu dhintay Sayidku ? Xaggee buu ku dhintay ?

II. **Weedhahan dib u qor adiga oo isticmaalaya falka meelahan lagu muujiyey :**

1. Sayid Maxamed (wax) ahaa nin waddani ah.
2. Caashi (wax) ahayd inan wanaagsan.
3. Daraawiishtu waxa ay (ahaa) askarta Sayidka.
4. Adigu (waxa) tahay arday (wanaag).

5. Annagu (waxa) nahay dad xor ah.

6. Innagu (waxa) nahay Soomaali.

**III. Erayadan kuwo u liddi ah keen :**

Fuley, deeqsi, colaad, miyir, fariid, saq-dhexe, hore u socod, dhereg.

**IV. Maahmaahahan macnahooda sheeg :**

1. Qofkii tiisaba daryeelaa tu kalana ku dara.

2. Daacadi ma hungawdo.

3. Oodo dhacameed sida ay u kala sarreeyaan baa loo kala guraa.

4. Bohol hadimo ha qodin ku dhici doonteene mooyaane.

## 21kii OKTOOBAR

Sannad walba marka ay bishu tahay 21ka Oktoobar waxa laga dabbaaldegaa dalka Jamhuuriyada Dimoqraadiga ee Soomaaliya oo dhan: magaalooyinka, tuulooyinka iyo baadiyahaba. Maalintaas waxa lagu xusuustaa kacaankii 21ka Oktoobar 1969, dalka Soomaaliyeed ka curtay.

Meel kasta oo waddanka ka mid ah iyo debaddaba waxa laga soo diraa dhambaallo hambalyo ah. Waxana loo soo diraa Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka, Golaha Sare ee Kacaanka iyo Xoghayayaasha. Dhambaaladaas dadweynuhu waxa ay ku hambalyeeyaan madaxda kacaanka, waxana lagu muujiyaa kalsoonida ummaddu ay ku qabto, Kacaanka. Waxaa lagu ammaanaa Madaxweynaha, hawlihii waaweynaa ee ay Ummadda Soomaaliyeed sannadkaa soo qabteen iyo dhibaatooyinkii ay ka soo gudbeen.

Magaala madaxda dalka ee Muqdisho, subaxda 21ka Oktoobar waxa uu dadweynuhu isugu soo baxaa gegeda salaanta ee jidka bandhigga Qaranka». Madaxweynaha ayaa halkaa kala qayb gala dadka dabbaaldeggaa weyn. Waxa kale oo ka soo qayab gala marti fara badan oo ka kala timaada meela kala duduwan ee adduunka ah. Madaxweynuhu waxa uu salaan sharaf ah ka qaataa ciidamada qalabka sida, shaqaalaha, ardayda, beeralayd raacatada, guulwadayaasha, hooyooyinka, wasaaradaha iyo wakaaladdaha dawladda iyaga oo ka wakiil ah dadweynaha Soomaaliyeed.

Dadweynaha Soomaaliyeed aad bay u jecelaystaan cayaarsiiska iyo bandhiga halkaa ka dhaca. Qalbigoodana waxa ay geliyaan qiiro iyo waddaninimo. Marka ay intaasi dhammaato ayaa Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanku uu akhriyaa khudbad dheer oo qiimo weyn leh, waxa uu dadweynaha Soomaaliyeed uga warramaa horumarkii la gaaray sannadkaas oo dhan, waxa kale oo uu ka warramaa arrimaha loo baahanyahay sanadka soo socda in la qabto iyo waxyaabo kale oo munaasib ah.

Meel kasta oo ay joogaanba dadka Soomaaliyeed aad bay u dhegeystaan hadalkaas. Waxana ay ku soo ururaan meel alla meeshii raadiyow leh. Halkaas ayay dabadeeto si xammaasad leh uga faalloodaan khudbbadda Madaxweynaha.

**LAYLIS :**

**I. Weydiino :**

1. Maxaa dhaca sannad walba bishu markay tahay 21ka Oktoobar ?

2. Waa maxay sababta loo dabaaldegaa ? Waa maxay lidda Kacaanka ?

3. Yaa dhambaallo loo diraa ?

4. Maxaa ku qoran dhanbaaladaa ?

5. Subaxa 21ka Oktoobar maxaa ka dhaca magaalada madaxda waddanka ?

6. Khudbadda Madaxweynaha sideebaa loo gaarsiiyaa dadka aan joogin goobta uu Madaxweynuhu ka akhriyaayo khudbadda ?

7. Ayuu salaan ka qaataa Madaxweynuhu ?

8. Dabbaaldegaasi muxuu kaga tagaa ummadda ?

9. Khudbadda Madaxweynuhu maxay ka koobantahay ?

10. Ma ka sheekayn kartaa sida loogu dabbaldego lidda weyn magaalada ama tuulada aad joogtid ?

11. Ka sheekee dugsigaagu qaybta uu ka qaato ?

12. Ubaxa kacaanku ma ka dhisan yahay halka aad joogtid ? Maxuu qabtaa ?

**II. Erayadan xarriijintu hoos marsantahay kuwo la macno ah ama kuwo u dhaw keen :**

1. Waxa shalay **loo** dabbaaldegey liddii 21ka Oktoobar.
2. Madaxweynuhu waxa uu dadka Soomaaliyeed **ku guubaabiyaa** in ay gaajada la dagaalamaan.
3. Dawladdu gargaar fara badan bay u dirtay gobolada abaaruhu **ku dhaceen.**
4. Dhulka Soomaalidu **waa hodan.**
5. Soomaalidu waa dad **madax bannaan.**
6. Cali weligii libaax **indho ma saarin.**
7. Xasan waa wiil **camal xun.**
8. **Waxa aan ku tala jiraa** in aan wax barto.
9. Mabaadiida kacaanka waxa ka mid ah in jahiliga **la ciribtiro.**
10. Shaar baan xalay soo **gatay.**

## CODKA-MACALLINKA

Waxan nahay waaddiga dugsiyada.
Waxan nahay waanada Macallinka,
Waagii beryaba ubax laga waraabshoo,
Waxan ku werweraynaa waddankiinna wax u barta,
Oo xanbaara waajibkiisa.
Wahsanmaynno, waabanmaynno,
Werwereegimaynno, oo weecweecanmaynno,
Guul-wacan. Cadow ka waabto.
Nolol wanaagsan, iyo barwaaqo,
Nabad laguu wadaago,
Ha ku waaro waddankeennu.

Waddankeennu waa wadnihii jirkeenna waraabinaayey,
Dhiigoo, waan ku warddiyaynnaa.

Waxan nahay waayaha adduunyada
Waxan nahay waddadda la sii maree,
Maalintii waliba barbarka looga warramoo,
Waxan wacad ku qaadnay geyigiinna wax u barta,

**Oo ka jira waxyeelada.**

**Waalidkiinna, wehelkiinna, iyo walaaleheenba,**

**Wiiradda aan ka dhawrnoo.**

**Wada dadaalka ha ka walaacin,**

**Waaxyeheenna wadajirkeenna,**

**Soomaali weynoo isku duuban waayimaayo.**

**Waddankeennu waa wadnihii jirkeenna waraabinaayey,**

**Dhiiggoo, waan ku warddiyaynnaa**

**I. Weydiino :**

1. Yaa heestan tiriyey ?
2. Ujeeddadeedu waa maxay ?
3. Gabayaaga heestan tiriyey wuxuu waddanka ku tilmaamay in uu yahay «waddnihii jirka waraabinaayey dhiigga». Muxuu taas ula jeedaa ?
4. Sheeg waxyaabaha waajibka ah ee dalku kugu leeyahay ?
5. Haddii intaa la helo maxaa suurtoobaya ? (dib ugu noqo shanta tuduc ee heesta u dambeeya).

**II. Erayadan hoos ku qoran micnahooda sheeg :**

Waadiga, Werwer, Wahsi, Waabasho, Waayaha

## CULUUNTA

Waxa aynnu samayno badankooda waxa innoo hawl yareynaya culuunta. Waxa kale oo ay culuunta innoo suuro gelisey samaynta qalabka aynnu wax ku qabsanno badankooda Qalabkaas waxa ka mid ah: birta, dharka, xaashida, quraaradaha iyo kuwo kale oo badan. Shay kasta oo alaabtaa ka mid ah samayntiisu waxa ay ku dhisantahay aqoon iyo hab cilmi ah.

Waxa aynnu ku noolnahay duni ay jiraan waxyaabo fara badan oo la yaab leh oo culuuntu ay dhalisay. Waxyaabahaa waxa ka mid ah: dayuuradaha, dayaxgacmeedka, raadyawga, taleefanka; Intaas oo dhan innagu marka aynnu aragno lama yaabno, waayo waa wax had iyo jeer aynnu aragno ama aynnu maqallo oo dhegeheennu iyo arageenuba ay u barteen. Konton sannadood ka hor raadyaw iyo dayuuradi midna ma uu jirin. Sinimuhu wuu yaraa, sawirraduna wax xun baa loo haystey Gawaariduna way yaraayeen qaalina way ahaayeen. Beryahaas, cilmiga dhakhtarnimada aad looma aqoon, sidaa darteed cudu-radu way badnayeen, dhimashada dadkuna aad bay u sarraysey Hadda aqoontii dhakhtarnimadu kor bay u kacday, cudurrada badankoodiina waa la gartay, daawana waa loo helay. Sidaa darteed dhimashadii aad bay intii hore uga yaraatay.

**I. Weydiino .**

1. Duni sidee ah baynnu ku noolnahay ?
2. Waxa aad qortaa saddex wax oo adiga kuu caadi ah, hase yeeshee aan konton sannadood ka hor jiri jirin.
3. Ma u malaynaysaa awowgaa iyo ayeydaa markii ay yaryaraayeen in ay arki jireen dayuurad, gaari, ama raadiyaw ?
4. Qor saddex wax oo kale oo wagaa aan jiri jirin hase yeeshee maanta jira ?

5. Waxa aad qortaa saddexda wax ee kuugu yaabka badan dunidan maanta. Waayo ?

**II. Weedhaha hoos ku qoran balbaallaari :**

Tusaale : Maxamed baa dorrad galab shaar soo iibsaday: Maxamed baa shaar cusub dorraad galab soo iibsadey.

1. Bisad baan arkay.
2. Kaasi waa walaalkay.
3. Caashi dugsiga ayay tagtaa.
4. Berri ayaan magaalada tegayaa.
5. Waxa uu leeyahay laba sac.
6. Surwaalkaygii waa la xaday.
7. Cali wuu weynyahay.
8. Nin baa mas dilay.
9. Roob baa da'ay.
10. Maxamed kursi buu ku fariistay.